



## **Xaashida Macluumaadka: Tallaalka Teetanada, Gawracatada, Xiiqda (Tdap)**

### **Waa maxay teetanadu (daan qufulka)?**

Teetanada waa cudur halis ah oo dhici kara haddii wasakhda bakteeriyada keenta teetanada ay gasho dilaaca maqaarka. Bakteeriyada teetanada waxaa laga helaa meel walba, sida caadiga ah ciidda, boodhka iyo digada. La iskuma gudbiyo qof-qof. Teetanada waxay keentaa murqaha qoorta, gacmaha, lugaha iyo caloosha oo ku xanuuna. Waxa kale oo ay keeni kartaa gariir xanuun badan kaasoo oo ku filan inuu jebiyo lafaha. Xataa daawaynta hore, teetanada ayaa disha laba ka mid ah 10kii qof ee qaada.

### **Waa maxay gawracatada?**

Gawracatada waa cudur halis ah oo ku dhaca sanko, cunaha iyo maqaarka. Waxay keentaa cune xanuun, qandho iyo qarqaryo. Waxa kale oo ay keeni kartaa dhibaatooyin aad halis u ah sida dhibaatooyinka neefsashada, wadne xanuunka iyo dhaawaca neerfaha. Gawracatada ayaa disha hal ka mid ah 10kii qof ee cudurka qaada. Inta badan waxa lagu kala qaadaa qufaca iyo hindhisada.

### **Waa maxay xiiqdheertu (qufaca xiiqda)?**

Xiiqdheertu waa cudur caan ah oo sababa jirro qufac oo daba dheeraatay. xiiqdheertu waxay si gaar ah khatar ugu tahay dhallaanka. Qufacani wuxuu qofka ku keeni karaa inuu matago ama uu joojiyo neefsiga muddo gaaban. Qufucu wuxuu socon karaa toddobaadyo wuxuuna adkeyn karaa in wax la cuno, la cabbo ama xitaa neefsashada. Xiiqdheertu waxay sababi kartaa dhibaatooyin halis ah sida oof-wareen. xiiq-dheertu waxay kaloo sababi kartaa dhaawac maskaxeed iyo qalal, gaar ahaan dhallaanka. Xiiqdheertu waxay si fudud ugu faaftaa qufaca ama hindhisada qofka qaba. Dadka waaweyn waxaa loo aqoonsan yahay inay yihiin isha ugu weyn ee caabuqa xiiqdheerta ee dhallaanka iyo carruurta yaryar. Dadka qaangaarka ah iyo kuwa waaweyn ee cudurka qaba waxay u gudbin karaan cudurka dhallaanka aan weli si buuxda loo ilaalin oo halis weyn ugu jira dhibaatooyinka xiiqdheerta.

### **Yaa uqalma in la siiyo tallaalka ay dawladdu maalgeliso?**

- Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 14 ilaa 16 sano waxay u baahan yihiin tallaalka Tdap (toban sano kadib qiyaastoodii 4 ilaa 6 sano)
- Dhammaan dadka waaweyn ( $\geq 18$  jir) waxay uqalmaan hal qiyaas oo Tdap ah (guud ahaan 10 sano kadib qiyaasta Tdap ee dadka waaweyn)
- Dhammaan shaqsiyaadka uurka leh waxay uqalmaan xilliga uur kasta si looga hortago xiiq-dheerta, iyadoon loo eegin taariikhda tallaalka Tdap ee hore.

### **Yay tahay inaan la siin tallaalka Tdap?**

Shakhsiyaadkan waa in aanay qaadan tallaalka haddii ay:

- Xasaasiyad ka qaadeen garoojo hore oo ah tallaalka ka kooban gawracatada, teetanada ama xiiq-dheerta.

- Xasaasiyaad ku yeeshaan mid ka mid ah qaybaha tallaalka iyo/ama maaddooyinka uu ka kooban yahay tallaalka.
- Leeyihiin taariikh hore oo ah cudurka caabuqa maskaxda (encephalopathy) 7 maalmood gudahooda markii la siinayo tallaalka leh qaybaha xiiq-dheerta ah.
- Leeyihiin taariikh hore oo ah cudurka Guillian-Barré syndrome (GBS) lix toddobaad gudahood markii la siinayo qiyaasta tallaalka teetanada..
- Leeyihiin qandho sare ama caabuq ka badan hargab (tallaalka waa in dib loo dhigo).

Fadlan kala hadal bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka haddii aad leedahay xaalad daran oo saamaynaysa nidaamka difaacaaga, ha ahaato cudur ama daawayn ama haddii aad dareentay goobta duritaanka oo si daran kuugu xanuuntay kadib qiyaastii hore ee teetanada ay ku jirto 10kii sano ee la soo dhaafay.

### **Tallaalka Tdap ma leeyahay badbaado?**

Haa, tallaalka Tdap waa badbaado. Waxyeellooyinka tallaalka Tdap caadi ahaan waa kuwo sahlan waxaana ka mid ah xanuun iyo/ama casaan goobta la duray. Daal, madax-xanuun, qandho, jir xanuun guud iyo nabar ama barar ayaa sidoo kale dhici kara. Calaamadahani waxay caadi ahaan socdaan hal ama laba maalmood oo keliya tallaalka kadib.



## Fiche de renseignements : Vaccin contre le tétanos, la diphtérie et la coqueluche (dcaT)

### Qu'est-ce que le tétanos?

Le tétanos est une maladie grave que l'on peut contracter lorsqu'une coupure sur la peau entre en contact avec de la terre qui contient la bactérie causant la maladie. Cette bactérie se trouve partout, généralement dans la terre, la poussière et le fumier, toutefois, cette maladie ne se transmet pas d'une personne à l'autre. Le tétanos provoque des crampes musculaires au niveau du cou, des bras, des jambes et de l'estomac, et peut également causer des convulsions douloureuses qui peuvent se révéler assez graves pour causer des fractures. Même lorsque les patients reçoivent un traitement précoce, deux personnes sur dix ayant contracté le tétanos en meurent.

### Qu'est-ce que la diphtérie?

La diphtérie est une maladie grave du nez, de la gorge et de la peau. Elle peut causer des maux de gorge, de la fièvre et des frissons de même que de graves complications comme des problèmes respiratoires, une insuffisance cardiaque ou des dommages aux nerfs. La diphtérie tue environ une personne sur dix atteinte de la maladie et elle se propage généralement par la toux et les éternuements.

### Qu'est-ce que la coqueluche?

La coqueluche est une maladie répandue provoquant des épisodes de toux prolongés et elle est particulièrement grave chez les nourrissons. Cette toux peut entraîner des vomissements ou des arrêts respiratoires pendant une courte période. La toux peut durer plusieurs semaines et rendre difficile le fait de manger, de boire et même de respirer. La coqueluche s'accompagne dans certains cas de complications graves, comme la pneumonie, et peut causer des dommages au cerveau et des convulsions, en particulier chez les bébés. Elle se propage facilement d'une personne à l'autre par la toux et les éternuements. Les adultes sont la principale source de transmission chez les nourrissons et les jeunes enfants. En effet, les adultes et les adolescents qui en sont atteints peuvent transmettre la maladie aux nourrissons, qui ne sont pas encore entièrement protégés et qui courent un risque plus grand de souffrir de complications.

### Qui peut recevoir le vaccin financé par le secteur public?

- Les adolescents âgés de 14 à 16 ans doivent recevoir le vaccin dcaT (10 ans après avoir reçu la dose administrée aux enfants de 4 à 6 ans).
- Tous les adultes (âgés de 18 ans ou plus) sont admissibles à une dose du vaccin dcaT (en général, celle-ci est administrée 10 ans après la dose reçue à l'adolescence).
- Chaque personne enceinte est admissible lors de chaque grossesse afin d'être protégée contre la coqueluche, et ce, peu importe les vaccins dcaT qu'elle a reçus par le passé.



## Qui ne devrait pas recevoir le vaccin dcaT?

Une personne ne devrait pas recevoir ce vaccin si elle:

- a déjà eu une réaction allergique à une dose du vaccin contre le tétanos, la diphtérie et la coqueluche;
- est allergique à l'un des composants ou des ingrédients du vaccin;
- a déjà souffert d'une encéphalopathie dans les sept jours suivants l'administration d'un vaccin contenant des composants anticoquelucheux;
- a déjà souffert du syndrome de Guillain-Barré dans les six semaines suivant l'administration d'une dose du vaccin contre le tétanos.
- souffre d'une forte fièvre ou d'une infection plus grave qu'un rhume (la vaccination doit être reportée).

Veillez parler à votre fournisseur de soins de santé si vous êtes atteint d'un grave problème de santé ayant une incidence sur votre système immunitaire, soit en raison d'une maladie ou d'un traitement, ou si vous avez eu une forte réaction au site d'injection à la suite d'une dose de vaccin contre le tétanos au cours des 10 dernières années.

## Le vaccin dcaT est-il sécuritaire?

Oui, le vaccin dcaT est inoffensif. En général, les effets secondaires de ce vaccin sont légers et comprennent une douleur ou une rougeur au point d'injection. La fatigue, les maux de tête, la fièvre, les douleurs corporelles généralisées et des articulations douloureuses ou enflées figurent parmi les autres effets possibles. Les symptômes disparaissent généralement un ou deux jours après la vaccination.